



DISTRICT OFFICE | 100 Lincoln Drive | Saint Peter, MN 56082 | 507-934-5703 (Office) | 507-934-2805 (Fax) | www.stpeterschools.org

February 20, 2020

Waalidka ama Ilaaliyaha Qaali:

Iyadoo lagu dadaalayo caawinaada degmooyinka Minnesota si ay u bixiyaan barnaamijyo iyo adeegyo lala beegsanayo arday kasta si ay u guulaystaan, degmooyinka waxaa sharcian laga doonayaa in ay codsadaan abtirsiin faahfaahsan ama macluumaad ku saabsan jinsiyidooda asal ahaan oo ku salaysan kooxaha ugu waawayn Minnesota, wixii ka sareeya wixii laga soo uruuriyay Foomka isqorista ee hoos yimaada sharciga Federaaliga tan iyo 2008. Waalidiinta ama mas'uulka loogama baahna n aay ka jawaabaan su'aalaha Fedraaliga (qoraalka madow) ee Foomka jinsiga iyo qowmiyadaha oo loogu tala galay ilmahaaga. Laakin, haddii aad doorato in aadan ka jawaabin su'aalaha Fedraaliga ah (qoraalka madow), sharciga Fedraaliga wuxuu u baahan yahay dugsiyadu in ay adiga kuu dooraan. Su'aalaha gobolka ayaa lagu calaamidiyey "Xulasho", dugsiyaduna kuuma buuxin doonaan macluumaadkaan. Diidmada jawaabta ma saameyn doonto diiwaangelinta iskuulka.

Sharciga cusub awgiis, waxaa lagu waydiinayaa in aad soo gudbiso xogta cunugaaga. Laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2019-20, dugsiyada Minnesota waxay uruurinayaan macluumaadkan iyaga oo isticmaalaya qaybaha cusub. Sidoo kale, waxa dhici kartaa in lagu waydiiyo in aad buuxiso foom dib loo casriyay sanadka dambe. Waaxda Waxbarashada ee Minnesota waxay sii wadi doontaa in ay ku darto wixii jawaab celin ah ay soo gudbiyaan dadwaynaha.

Si aad uga warbixiso macluumaadka cunugaaga, fadlan buuxi foomkan la socda oo na ku soo celi xafiiska iskuulka ugu dambeyn February 28th ama ka cusboonaysii macluumaadka tirakoobka cunugaaga ee Xariirka Waalidka, "Infinite Campus Parent Portal". Xusuusin: Waxaad dooran kartaa inaad sheegta xulashooyinka faahfaahsan adigoo calaamadeenaya "diid adigoo tilmaamaya" doorashada. Waxaad kaloo calaamadeen kartaa "kale" doorasho hadii aadan arkin kooxdaada. Shaqaalaha dugsiyada loogama baahna in ay ku qoraan ama u dooraan ardayda kooxahan faahfaahsan.

Fadlan buuxi oo soo celi foomkan la socda. Xiriirinta ilaha MDE iyo dukumiintiyada waxaa laga heli karaa websaydhka degmada qeebta "About > Counting All Students." Wixii macluumaad ah oo ku saabsan qaybaha warbixinta, fadlan la soo xidhiidh Kris Leclerc 507-934-5703 ext. 1007.

Si daacad ah,

Jeff Olson

Superintendent, Saint Peter Public Schools